



Waxbarasho Wadajir ah Tallaabo kasta oo la qaado

MAGAALADA TORONTO | KOOXDA ADEEGGA CARRUURNIMADA HORE | XARUNTA MEESHA SURREY (SURREY PLACE CENTRE)

XAANSHI TILMAAN-BIXINEED

Isticmaalka Nidaamyada Muuqaalka Ah oo Xiriirsan oo aad ku Barayso Ilmahaaga Xirfado uu iskiis isu-daryeelo

Inuu qofku barto hawlo la xiriira inuu iskiis isu-daryeelo sida dhar-xirashada oo kale waxay qaadataa waqti iyo tababarasho. Nidaamka muuqaalka ahina waxaa weeye hawl asaasi ah kana kooban sawirro taxane ah oo ku tusinaya tallaabooyinka lagama maarmaanka ah oo lagu dhammaystiro hawl.

Inaan u kala qaadno hawsha la xiriirta inuu ilmuhu iskiis isu-daryeelo dhowr tallaabo (taasi oo loo yaqaan qiimeyn hawleed) waxay u hawl-yarayn doontaa ilmahaaga inuu kula socdo feker ahaan marka aad u bilowdo inaad barto sida uu wax u qabsado. Annagoo ah dad waaweyn, waxa aan mararka qaarkood illownaa inta tallaabo oo ay hawli ka kooban tahay maxaa yeelay waxa aynu wax qabsanaynay muddoo aad u dheer. Bal aan tusaale ahaan u qaadano ‘rumaysiga ilkaha’. Halkan waxaa ku jira qaar ka mid ah tallaabooyinka arrintani la xiriira oo ah: helista uu helayo qof buraashka ilkihiisa, daawada ilkaha lagu rumaysto (cadaydo) oo ayana la raadsado, afka oo laga furo daawada ilkaha lagu rumaysto, oo dabeetana lagu tuujiyo (la mariyo) buraashka, afka oo la kala qaado (la furo), ilkaha oo si debeansan loo rumaysto, iyo in biyo la isaga nadiifiyo daawada ilkaha lagu rumaysto. Xataa hawl yar oo la mid ah ilkaha oo la rumasyto ayaa noqon karta hawl aad u dhib badan.

Iminka, liis-garayso (qoro) tallaabooyinka ku lug leh hawlaha is-daryeelista oo aad jeclaan lahayd inaad barto ilmahaaga. Marka aad qoratid tallaabooyinkaasi aan ka hadalnay, si gooni ah uga digtoonow una xusuusnow tallaabooyinka uu qabsan karo ilmahaagu iyo kuwa ay suurtagal tahay inay ku adkaadaan. Taas ayaana kaa caawin doonta inaad qorsheysato tallaabooyinka ay habboon tahay inaad xoogga saartid marka aad u bilowdo waxbariddiisa.


Marka aad u samaynayso ilmahaaga nidaam muuqaal aho oo xiriirsan, xusuusnow inay ku adag tahay carruurta (iyo dadka waaweynba) inay hal mar haggag u fahmaan wax ka badan lix ama toddoba tallaabo. Mar haddii aad qoratid tallaabooyinka la xiriira hawlaha uu qof iskiis isu-daryeelayo, waxa aad u diyaar-garowday inaad samaysatid nidaam muuqaal ah oo xiriirsan. Taas ayaana ka caawin doonta ilmahaaga inuu:

1. Ogaado waxyaalaha uu u baahan yahay inuu ku dhammaystiro hawsha.
2. Barto sida uu u adeegsan lahaa waxyaalahaasi uu u baahan yahay.
3. Fahmo sida ay isug xigaan tallaabooyinka ay tahay waajib inuu raaco si uu u dhammaystiro hawsha.

Noocyada sawirrada aad Isticmaali doonto

Waxa aad isticmaali kartaa sawirro carruur kale oo ilmaha la walaalo ah oo muujinaya ayagoo dhammaystiranaya hawsha ay iskood isu-daryeelayaan, waxaa kale oo aad ka goyn kartaa wargeysyada toddobaadlaha ah sawirro, ama adigaaba gacantaada ku sawirri doona. Waxaa kale oo aad booqan kartaa Internetka qeybteeda laga helayo sawirrada muuqaalka ah si aad u adeegsato sawirrada ku jira oo kale. Hubi inay noqdaan sawirradu kuwo si fiican u muuqda loona arki karo oo uu ilmahaagu awoodi karo inuu garto waxyaabaha ku jira sawirrada ama taswiiraha aad adigu samaysay. Waana Fikrad fiican inaad ereyo ku calaamadiso tallaabo kasta oo ku jirta siday hawlaha isugu xigaan, si ay taasina xusuusiye ugu noqoto qof kasta oo ka qeyb-qaadanaya hab-raaca nidaamka is-daryeelka ilmahaaga. Tusaale ahaan, ereyada “Qaado buraashka ilkaha’ waxa lagu dul qori karaa sawirka ‘buraashka ilkaha’. Adigoo adeegsanaya isla ereyadadaasi oo aad ku sharaxaysid waxqabayada waxay u fududeyn

doontaa ilmahaaga inuu barto tallaabooyinku siday u kala horreeyaan (isugu xigaan).



Adigoo ilmahaaga baraya xirfadda cusub

Marka aad barayso ilmahaaga xirfad cusub, waxtar ayay u yeelanaysaa haddii meesha aad isticmaalaysaa ay tahay mid nidaamsan kana reeban wax ilmaha ihtimaamkiisa jeedinaya. Tusaale ahaan, musqusha gudaheeda, waxa aad ka samaysan kartaa armaajada (meesha wax lagu rito) ama kowntarka dushiisa meel aad saartid alaabta uu ilmahaagu u baahan yahay si uu rumaysto ilkihiisa. In aad siisid ilmahaaga buraash midabbo badan leh iyo daawada ilkaha lagu rumaysto oo ah ‘nooca ay carruurta jecel yihiin’ ayaa waxay ka caawin doontaa ilmaha inuu jeclaysto ‘rumaysiga ilkaha’.

Bar ilmahaaga tallaabooyinka rumaysiga ilkuhu sida ay isugu xigaan ama ay u kala horreeyaan adigoo markaasi ku dhejinaya sawirro u tilmaamaya ilmahaaga sida uu ilkihiisa u rumaysan (cadayan) lahaa meel la heer ah ama la siman aragtida indhihiisa, adigoo islarahaantaasina farta ku fiiqaya tallaabo kasta, una akhriyaya ilmaha astaan kasta ka hor intaadan dhammaystirin fal kasta. Marba haddii uu barto ilmahaagu sida ay u kala hormarayaan tallaabooyinka rumaysiga oo muuqaalka ah, waxa markaasi aad weydiin kartaa

inuu sheego ama fartaba uu ku fiiqo tallaabada labaad oo taasi ku xigta.

Waxaa suurtagal ah in ay jir ahaan ku adkaadaan inuu ilmahaagu barto tallaabooyinka qaarkood inkastoo uu garanayo waxa la qabanayo. Haddii uu markaasi jeho-wareero, weydii bal inuu u baahan yahay caawimaad dabeetana ku hag tallaabooyinka adigoo gacantaada dul-saaraya gacantiisa. Waana wax fiican haddii aad u baahan tahay inaad ka caawiso intooda badan nidaamyada uu ilkihiisa ku rumaysanayo. Qeybtase ugu muhiimsani waxaa weeye inaad ku ammaantid ilmahaaga dadaalkiisa.

Waqtiga habboon gudihiiis, waxaa suurtagal ah inaad aragtid inuu ilmahaagu awoodi karo inuu iskiis u dhammaystiro qaar ka mid ah tallaabooyinka aynu soo sheegnay ayadoo kormeerka lagu samayayna uu yahay mid yar. Marka heerkaasi la gaaro, waxa aad yarayn kartaa sawirrada muuqaalka ah oo lagu tusinaayo ilmaha sida ay isugu xigaan tallaabooyinka rumaysigu. Tusaale ahaan, ‘qaado buraashka ilkaha iyo daawada ilkaha lagu rumaysto’ waxa aad ugu beddeli kartaa inaad ku tiraahdo, ‘ilkaha rumayso’, iyo ‘biyo ku nadiifi afkaaga’. Marka aad si hubaal ah u ogaatid inuu ilmahaagu si habboon u rumaysanayo (cadayanayo), waxaad u oggolaan kartaa inuu iskiis u cadaydo ilkihiisa maalintiiba hal mar. Hubi tallaabooyinka ilmaha tusinaya siduu u kala horreysiin lahaa marka uu rumaysanayo inay noqdaan kuwo meel ku dhegan ama suran si ay ugu noqdaan ilmaha xusuusiye!

Xusuusnow in wixii taageerooyin muuqaal ahi ay ilmaha u fududeyn karaan inuu wax fahmo dadkana uu la xiriiro. Isticmaalka muuqaallada oo aad ku barayso ilmahaaga xirfadaha is-daryeelidduna waxaa weeye tallaabada ugu horreysa oo uu ku gaarayo madax-bannaani.